



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Golaha Shacabka Soomaaliya**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

**KU SAABSAN**

**TOOSINTA QODOBKA 138<sup>aad</sup> EE DASTUURKA  
FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**Muqdisho, 2 Seteembar 2012**

A handwritten signature in black ink, appearing to be the name of the official responsible for the document.

## GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:**

Qodobka 89<sup>aad</sup> (1) ee Dastuurka oo xeerinaaya in Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka ay doortaan labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka oo wada fadhiya, fiiro gaar ahna u yeeshay in ay lagama maarmaan tahay in ugu dambayn 10<sup>ka</sup> bisha Seteembar 2012 in dalka Madaxweyne loo doorto;

**Markuu arkay:**

Aftiqoraalka Ergada Shacbiga Soomaaliya oo si ku-meel-gaar ah u ansixisay Dastuurka Federaalka dib-u-eegista iyo toosinta Dastuurkana u igmatay Gola Shacabka Jumhuuriyadda Soomaaliya;

**Markuu arkay:**

Soo Jeedinta Guddoomiyaha Golaha Shacbiga kuna saabsan toosinta qodobka 138 oo ay lagama maarmaan tahay in lagu kordhiyo faqrad 2-aad oo suurtagelisa in la qabto doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Soomaaliya ka hor taariikhda kor ku xusan;

**Golaha Shacabka:**

Kalfadhigiisa 1<sup>aad</sup> Fadhigiisa 6<sup>aad</sup> ee 2<sup>da</sup> Seteembar 2012, kuna kulansan Xaruntiisa Muqdisho oo ay goobjoog yihiin 208 Xildhibaan oo codeynaya, wuxuu wadar-oggol ku ansixiyey Qodobbada soo socda:

### Qodobka 1<sup>aad</sup>

#### Wax-ku-kordhin Qodobka 138<sup>aad</sup> ee Dastuurka

1. Goluhu markuu qaddariyey in ay lagama maarmaan tahay in Dawladda Federaalka ee dalku yeesho Madaxweyne Jumhuuriyadeed oo Baarlamaanka Federaalku doorto ugu dambayn 10<sup>ka</sup> bisha Seteembar 2012; arkay in Dawladaha xubinta ka noqon lahaa Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka aanay weli dhisnayn, saas daraadeedna suurtagal ahayn  
*"In Madaxweynuhu ay doortaan labada Gole ee Baarlamaanka oo wada fadhiya"* sida uu qabo qodobka 89<sup>aad</sup> ee Dastuurka Federaalka sida ku-meel-gaarka loo ansixiyey";
2. Goluhu wuxuu aqlabiyad 208 (laba boqol iyo sideed) cod ku ansixiyey in faqrad 2<sup>aad</sup> lagu kordhiyo Qodobka 138<sup>aad</sup> ee Dastuurka Federaalka oo u qoran sida halkan hoose ku xusan:



**Qodobka 138<sup>aad</sup> Faqraddiisa 2<sup>aad</sup> ee cusub:** “Dhaqangalka qodobbada la xiriira Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalkameelaha lagu xusay Dastuurkan, dib ayaa loo dhigay inta laga gaarayo samaynta dhammaan Dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka iyo inta kuwa matalaya loo dhaarinaayo xilka ayagoo ah xubno ka tirsan xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka. Inta uu laalan yahay samaynta Aqaalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, Golaha Shacabka ayaa qabanaaya dhammaan waajibaadka iyo hawlaha dastuurkan siiyey Aqalka Sare wuxuuna u shaqaynaya sida baarlamaan ka kooban hal aqal, si daacadnimo ku jirtana maanka ugu haynaya Mabaadii’da Asaasiga ee awood qaybsiga ee nidaamka federaalka lagu qeexay Qodobka 3 (3) ee Dastuurkan iyo danaha gobollada soomaaliyeed marka la gaarayo go’aannada.”

### Qodobka 2<sup>aad</sup>


#### Nuqulka Rasmiga ah ee Dastuurka

Wasiirka Sii-Hayaha Wasaaradda Dastuurka iyo Dib-u-Heshiisiinta waxaa la faraya nuqullo Dastuurka Federaalka oo ay ka muuqato saxiixa Wasaaradda oo tasdiiqineysa in uu yahay nuqulka rasmiga ah oo Golihii Ergooyinka Soomaaliya sida ku-meel-gaarka ah usoo ansixiyeen uu Guddoonka Golaha Shacbiga soo gaarsiiyo muddo sadax beri gudahood si loogu qaybiyo xildhibaanada Golaha waajibkooduna uga gutaan.

### Qodobka 3<sup>aad</sup>

#### Dhaqangalka Qaraarka

Qaraarkan wuxuu dhaqangalaya markuu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Soomaaliya.

  
M. ne Muxammad Sh. Cusmaan “Jawaari”  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

